

FAAFIN

الرسمية



RASMI AH

الجريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad Mudiqsho, 2 Luuliyo 1975

L. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraaha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

- SHARCI L. 43 42 Juunyo 1975 — *Gunno oo ku saabsan L-taliyayaalka Guddiyada M.G.S.K.* Bog 532
- SHARICI L. 44 17 Luuliyo 1975 — *Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada ee Xamar* » 533

BOGGA LABAAD

XEER

- XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA 15 Junyo 1975, L. 95 — *Magacaabidda Guddiga Kacaanka ee Bender Beyla* » 536
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 16 Junyo 1975, L. 96 — *Dhul Dawladeed la siiyay Gacantanal oo geliyey Jaalle Kastaldo Raffaelo* » 537
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 31 Junyo 1975, L. 97 — *Dhul gadatay Mariam Xaaji Saalim Saalax iyo Carrurteeda* » 539

BOGGA SEDEXAAD

TALCOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH
ARREDAMENTI METALLICI SOMALA - AR.ME.S. - S.p.A

1 Luuliyo 1975, *Ogeysiis isu imaatin Guddinimo oo Caadi ah (103)* Bog 542

ARREADMENTI METALLICI SOMALIA - AR.ME.S. - S.p.A
1 Luuliyo 1975, *AVVISO DI OCNVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA (103)* » 542

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGESYA 6 Junyo 1975, *Buugga Lacagta L. 4469/7 So. Sh. 500/ = u leeyahay Xasan Cali Xasan (104)* » 543

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE 29 Maajo 1975, *Buugga Kaydka Lacagta L. 3308, So Sh. 4.000/ = (afartankun) Shs. u leeyahay Maxamed Nuur Yuusuf (105)* » 544

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE 6 Junyo 1975, *Buugga Kaydka Lacagta L. 1.316, Shs. 22.295, uu leeyahay Qaasim Maxamed Cabli (106)* » 544

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR 10 Luulyo 1975, *Buugga Lacagta L. 985/4 Shs. 8.898/ = u leeyahay Isaamciil Maxamuud Nuux (107)* » 545

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR, 15 Luuliyo 1975
Buugga Kaydka Lacagta L. 2150/4 Shs. 2.215/ = u leeyahay Cabdillaahi Cilmi Sahal (107bis) » 545

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 43 Tr. 2 Luuliyo 1975.

Gunno oi èu saabsan L-taliyayaalko Guddiyada M. G. S. K.

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 Taariikhdiisuna tahay 6.12.74 oo ku saabsan Nidaamka Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada, oo lagu dhisay Guddiyo oo xubno ka ah rag ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka iyo La-taliyayaal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Mar allaale oo ay dhacdo in qof La-taliye ah oo ka tirsan Guddiyada Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka oo la xiro, wuxuu xaq u yeelanayaa seddex dalool u dhig hal dalool (1/3) lacgata oo uu qaadan jiray.

Qodobka 2aad

Gunnada oo lagu tilmaamay qod. 1aad eesharcigan, waxay ku egtahay bixinteeda:-

1. Marka laga bilaabo taariikhda xukunka kama dambeyska ah oo ay Maxkamad ku dhawaaqdo iyadoo ku caddeyneysu inuu yahay dembi, ama,
2. taariikhda oo Golaha Sare ee Kacaanka go'aan ku gaaraan inay dhamaneyso bixinta lacagtaas.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo taariikhda 6.12.74.

Qod. 4aad

Sharcigani waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

GUDDOONSHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Borre

SHARCI L. 44 Tr. 17 Luuliyo 1975

Guddoomiyaha Maxkamada Badbaadado Dalka ee Xamar.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Shaciyada kala ah:-

Sharciga tirsigiisu yahay 3 10. 1. 1970;
Sharciga tirsigiisu yahay 7 ee 21.1.1970;
Sharciga tirsigiisu yahay 20 ee 16.1.1971;
Sharciga tirsigiisu yahay 46 ee 10.8.1971;
Sharciga tirsigiisu yahay 50 ee 10.6.1971;
iyo Sharciga tirsigiisu yahay 60 ee 20.9.1971;

MARKUU TIXGELIYEEY: Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka:

WUXUU GUDDOONSHEY

Qodobka 1aad

Markii ay ku timaado Guddoonshaha Maxkamadda Badbaada Dalka ee Xamar sabab u diidda (impedimento) in uu madax ka noqdo qaadidda Dacwooyinka, waxaa dacwoynikaas Guddoonshe ka noqon kara lataliye uu isagu magacaabo.

Qodobka 2aad

Waxaa la tirtiray Sharci kasta oo aan la socon karin Sharcigan:

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markii la saxiixo.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

(S Gaas Maxamed Siyaad Barre)

BOGGA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

2 Luuliyo 1975 L. 94

Magacaabid Guddoomiyayaal Degmo.

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aad (Xarafka L) iyo kan 10aad Lambarka 3aad ee Sharciga 52 lana soo saaray 8eedii Juun 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddomiyeyal Degmooyinka: Buur Hakabo, Baardheere, Doolow, Beled Weyne, Jeriban, Eyl, Qardho, Iskushauban, Caluula, Burco, Ceel - Dheer, Lughaye, Waajid, Baraawe, Berbera, Buhodle iyo Cabuud Waaq.

WUXUU GOOYEV

Qodobka 1aad

Saraakiisha hoos ku qoran, waxaa loo magacaabay iney noqdan Guddomiyeyaal Degmooyinka kor lagu sheegay, iyadoo Sarkaal walba hortiisa lagu dhinac qoray Degmada uu ka noqonaayo Guddoomiye iyo taariikhda la magacaabay:

- 1) Gaashaanle Xersi Faahiye — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Buur Hakaba, marka laga bilaabo 30.12.1974.
- 2) Jaalle Sheekh Yarow Cabdiyow — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Beled Weyne, marka laga bilaabo 30.12.74
- 3) L/Xiddigle Cali Faarax — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Doolow, marka laga bilaabo 30.12.1974.

- 4) Xiddigle Cali Jumcaale — Guddomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Waajid, marka laga bilaabo 27.7.1974ka.
- 5) Dhamme Maxamed Xaaj iShire — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Baraawe, marka laga bilaabo 23.10.74ka.
- 6) Gaashnaale Maxamed Cartan — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Beled Weyne, marka laga bilaabo 30.12.7
- 7) Jaalle Muuse Yuusuf Shirwac — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Jeriiban, marka laga bilaabo 18.1.1975ka.
- 8) Jaalle Jaamac Gaas — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Eyl, marka laga bilaabo 30.12.1974ka.
- 9) Gaashaanle Cabdullaahi Xaaji Axmed — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Ceel-Dheer, markalagabilaabo 5.10.74;
- 10) Xiddigle Xaashi Maxamed Guuleed — Guddoomiyaha Guddiga kacaanka ee degmada Qardho, marka laga bilaabo 6.10.74
- 11) L/Xiddigle Maxamed Xaaji Axmed Yuusuf — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Iskushuban, marka laga bilaabo 30.12.1974.
- 12) Dhamme Cabdullaahi Maxamed Maxamuud — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Caluula, marka laga bilaabo 30.12.1974;
- 13) Dhamme Yaasiin Xaaji Barre — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Burco, marka laga bilaabo 30.12.19774ka;
- 14) Xiddigle Jaamac Kahaayre — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Buuhoodle, marka laga bilaaba 22.7.1974;
- 15) Dhamme Cabdullaahi Madar — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Berbera, marka laga bilaabo 4.9.1974ka.
- 16) Xiddigle Ibraahim Xaaji Cusmaan — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Lughaye, marka laga bilaabo 22.7.1974.
- 17) Jaalle Maxamed Aadan Mayle — Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Degmada Cabuud-Waaq, marka laga bilaabo 20.7.74

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Xeerkaani, wuxuu dhaqan galayaa ka bilaabanta taariikhda magacaabidda Saraakiisha, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Muqdisho, 14 Juun 1975.

XOGHAYAHA WASSARADDA ARRIMAHADA GUDAHA

(Jaalle S/Gaas Jaamac Moxamed Qaalib.)

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

2 Luuliyo 1975 L. 95

Magacaabiddo Guddiga Kacaonèa ee Degmada Bender Beyle.

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 72ka lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21/1972ka kuna saabsan Maamul ka Dawladda Hoose;

ISGAOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12125taariikh 13/12/1972kii oo hore loogu magacaabay qaybaha Wakiiladda Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Bender Beyle ee Gobolka Bari;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la Magacaabo Wakiiladda Beesha ee Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle, iyadoo la waafajinaayo qodobka 10aad Lambarkiisa 3aad, xarafka (c) ee Sharciga kor ku tilmaaman;

ISAGOO TEXGELINAYO Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bari.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Magacowga Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle qaybtiisa Wakiiladda Beesha.

Ka bilaabinta 20/10/1974ka, dadka magacyadoodu hoose ku taxan yihiin, waxaaloo magacaabay iney noqdaan xunbo Guddiga Kacaanka ee Degmada Bender Beyle oo ka tirsan Gobolka Bari:

- 1) Jaalle Sheekh Xasan Aw Cilimi Muuse;
- 2) » Ayaanle Axmed Canbar;
- 3) » Maryan Muuse Cali;
- 4) » Maxamed Dacar Guuleed;
- 5) » Xasan Cusmaan Nuur;
- 6) » Jaamac Nuur Ibraahim;
- 7) » Xaaji Cabdulqaadir Maxamed;
- 8) » Abshir Xaaji Nuux Cali;
- 9) » Cali Faarax Cadde.

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabinta 20.10.74 waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 15 Juun 1975.

**XOGHAYAHA DAWALDDA
EE WASAARADDA ARRIMA GUDAHA
(S/Gaas Jaamac Maxmaed Qaalib)**

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

2 Luuilyo 1975 L. 96

Dhul Dowladeed la siiyey, gocantana loo geliyey (*Libera Disponibilità*) Jaalle KASTALDO RAFFAEE èu yaal Muqdisho — Km. 6 (Agagaarka Cisbitaalé Digfer) kuna fadhiya mq. 1.820.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Ka-aanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soona baxay 13 Settembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 99 soona baxay 13 Settembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed 221 ee R e B taariikhda markay ahayd 9 Giugno 1964 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S L. 3/11 ee 21 Novembre 1967, taas oo lagu siiyay Jaalle SHARIIF CUMAR HAASHIM cad dhul ah ujeeddadiisu tahya dhis ku fadhiya mq. 3.640 kunyaal Muqdisho — Km. 6 (Agagaarka Cisbitaalé Digfer) «Xafadda Hodan»;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 4141 taas oo beddeshay middii lambarkeedu ahaa 15.225 laguna aqoonsaday fadhigaa 27°aad ee Guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahayd 14 Abriil 1975 kuna saabsaneed dhismo Guri — kuna fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamaha ka tirsan Waxaad Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdeeduna ahayd 9.6.1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggoladeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar Lamb. 4141 ee 6.10.1974 laguna xaqiijiyey sidd ay naqshaddu Guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggoaaanta (Nulla Osta dagganaashada Guri-ag ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan laguna siiyay xaashida Lamb. 127 ee 28.5.1975 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) Lamb. 6366 Reb. taariikh. 1 Maarso 1965 lagu diiwaan geliyey Xamar 5.5.1965 1.328 Atti Pubblici Vol. 16 oo ah caddeynta Notaayadda Michael J. Mariano taas oo SHARIIF CUMAR HAASHIM ka gaday kuna wareejiyay XAAJI YUUSUF CIGAAL oo u ah wakiil Shirkadda Somalia Farmaceutica, (SOMA-FARM) «SpA», wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fdahiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Qoral (Atto) Lamb. 12.477 Reb. taariikh. 25 Febbrayo 1971 lagu diiwaan geliyey Xamar 8 Maarso 1971 al n. 226 Atti I vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dott. MAXAMED FAARAX

SIYAAD taas oo Cabdullaahi Sheekh Maxamed Saadi, oo u ah wakiil Shirkadda Somalia Farmaceutica, (SOMALFARM) «SpA» wuxuu ka gaday kuna wareejiyay Sebastiano Insirello iyo Mohsin Ibrahim Cali Okera, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) Lamb. 13.133 Reb. taariikh. 12 Giugno 1972, lagu diiwaan geliyey Xamar 12.6.1972 al n. 403 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Faarax Siyaad taas oo SEBASTINO INSERELLO iyo MOHSIN IBRAHIM CALI OKERA ka gadeen kuna wareejiyeen KASTALDO RAFFAELE wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.820.

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal cadka dhulkaas Dowladda (Libera Disposibilita') oo ay ujeeddadiisu ahayed dhis, wuxuu soo saaraya.

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey loona aqoonsaday (Libera Disponibilita') KASTALDO RAFFAELE dhul ku fadhiya mq. 1.820 kuna yaal Muqdisho — Km. 6 (Agagaarka Cisbitaalka Digfer). Muqdisho, 16 Giugno 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
w.s. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

2 Luulyo 1975 L. 97

Dhul gadotay Mariam Xaaji Saalim Saalx iyo carruurteedo mq. 300.

Dhul gateen Faduma Saalim Maxomed, Saalim Muhsin Bin Mansuur iyo carruurtooda mq. 310,50.

Dhul gatay Axmed Shire Addawe mq. 300.

Dhul gatay Maxomed Axmed Sef mq. 310,50

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 siona baxay 1 Novembre 1973

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soona baxay 13kii Settembre 1956kii;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed lamb. 131 ee Reb taariikhda markay 11 Novembre 1974 laguna qoray Faafint aRasmiga ah ee J.D.S L. 12 ee 1.21.1974, taas oo lagu siiyey Jaalle AXMED CABUUD BA-XASHWAAN cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 1.416 kun ayaal Muqdisho — Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4145 taas oo beddeshay midii hore lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikh. markay ahayd 26.10.1974 kuna fadhiya mq 300.

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4142 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikh. markay ahayd 26.10.1974, kuna saabsaneed dhismo guri, kuna fadhiya mq. 310,50.

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4144 taas oo beddeshay midii taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhda markay ahayd 26.10.1974 kuna saabsaneed dhismo guri, kuna fadhiya mq. 300.

ISAGA OO ARKAY Naqshada 1.4143 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1703 laguna aqoonsaday fadhigii 22°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taariikhda markay ahayd 26.10.1974 kuna saabsaneed dhismo guri, kuna fadhiya mq. 310,50.

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii farsamaha ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Dhismaha Dhulka, taariikhduna ahayd 22.3.75

kuwaas oo caddeynayaan in naqshaddaha dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lambarkeeduna yihiin 4145, 4142 4144 iyo 4143 taariikhhooduna 6.10.1974 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaduhu guriyaha waafaqsanyihiin;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan yihiin Xamar Xaafadda Shibis laguna siiyey xaashadaha lambarkoodu 9757 ee 13 Set. 1962 iyo 311 ee 26 Gen. 1963 oo ay oggolaadn Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1.354 Reb. taariikh. 3.7.1961 lagu diiwaan geliyey Xamar 6.7.1961 L. 325/I. Qoraal Dowladeed, Buuga 11 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Warsame Cali «Daneet», taas oo AXMED CABUUD BAAXASHWAAN ka gatay kuna wareejiyay Mariam Xaaji Saalim ilo Carruurteeda wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 300, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1410 Reb. taariikh. 14.1.1962, lagu diiwaan geliyey Xamar 17.1.1962 L. 31 qoraal Dowladeed, buugga 12 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxamed Warsame Cali Danet, taas oo Axmed Abuud Baaxashwaan ka gaday kuna wareejiyey Mxamed Axmed Sef iyo Saalim Muxsin wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhul ah oo kufadhiya mq. 405, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA O OARKAY Qoraal (Atto 1.7471 Reb. taariikh. 21.1.65, lagu diiwaan geliyey Xamar 1 Feb. 1965 L. 112, qoraal Dowladeed Buugga 16 oo ah caddeynta Notaayada Dott. Maxmed Warsam eCali Danet taas oo AXMED ABUUD BAXASHWAAN ka gadya kuna wareejiyey Saalim Moxsin Bin Mansuur iyo Maxamed Axmed Sef wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 216, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) 1.7900 Reb. taariikh. 8.6.1965 lagu diiwaan geliyey Xamar 21.7.1965 L. 629 Qoraal Dowladeed, Buugga 17 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Warsame Cali Daneet, taas oo caddeyneeso in Maxamed Axmed Seef uu leeyahay dhul ku fadhiya mq. 310,50; Saalim Muhsin Bin Munsuur uu leeyahay dhul ku fadhiya mq. 310,50, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 2878 Reb. taariikh. 30 Ago. 1962, lagu diiwaan geliyey Xamar 1.9.1962 L. 545, qoraal Dowladeed Buugga 12 oo ah caddent aNotaayada Dr. Maxamed Warsame Cali Daneet, taas oo Saalim Muxsin Bin Mansuur ka gaday kuna wareejiyey Faduma Saalim Maxamed iyo Carruurteedii wax allaale wixii xuquuq ah oo saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 203, kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 14.535 Reb. taariikh. 14 Luuliyo 1960 lagu diiwaan geliyey Xamar 16.7.1960 L. 38 qoraal Dowladeed Buugga XI° oo ah caddeynta Notaayada Mario Ciotola taas oo Axmed Abuud Baxashwaan ka gaday kuna wareejiyey Cabdalla Islam Cabdalla Bin Asuum wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah

oo ku fadhiya mq. 200 kuna yaal Degmada Shibjs.

ISAGAOOARKAY Qoraal rayadka ah (Scrittura Privata laguna bixiyey xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna aheyd 25.2.1961 laguna diiwaan geliyey Xamar 2 Apr. 1961 L. 1827 qoraal rayad, Buugga 33, taas oo Axmed Abuud Baxashwaan ka garday kuna wareejyey Cabdalla Islam Cabdalla wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 100 kuna yaal Degmada Shibis;

ASAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 7527 Reb. taariikh. 9.3.66, lagu diiwaan geliyey Xamar 12 Maarso 1966 L. 161 qoraal Dowladeed, Buugga 17 oo ah caddeynta Notaayada Mayched Mariano taas oo Cabdalla Islam Cabdalla Bin Asuum ka gaday kuna wareejiyey Axmed Shire Addawe wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhija mq. 300 kuna yaal Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Libera Disponibiljta') oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis;

WUXUU SOO SAARAY

X E E R

1) Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, loona aqoonsaday Mariam Saalim Saalax iyo carruurteeda, dhul ku fadhiya mq. 300 kuna yaal Xamar Degmada Shibjs;

2) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Faduma Saalim Maxamed Saalim Muhsin Bin Mansuur iyo carruurteeda, dhul ku fadhiya mq. 310,50 kuna yaal Xamar Degmada Shibjs;

3) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Axmed Shire Addawe dhul ku fadhiya mq. 300, kuna yaal Xamar Degmada Shibis;

4) Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, loona aqoonsaday Maxamed Axmed Sef dhul ku fadhika mq. 310,50, kuna yaal Xamar Degmada Shibis.

Muqdisho, 31 Maajo 1975

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
w.s. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

BOGGA SEDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO W/XII LA MID AH

Arredamenti Metallici Somalia — AR.ME.S. S.p.A. 1.7.75

OGEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadda «Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S, oo Saldhigeedu yahay Muqdisho, waxaa la weeydinaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Rovato dalka Italia Xafiiska Notaril eDott. Francesco Durante in iVa Rossi, n° 29 maalinta 22ka Luuliyo 1975 saacadu 11ka subaxnimo, haddii shirkaaso suura geli waayo maalinta 22ka Luuliyo waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 29ka Luuliyo 1975 saacadu 11ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doonaa waxa weeye:

- 1) Xoog warrankii Maamulaha Guud iyo Baarayaasha Shirkada;
- 2) Hor dhig xaashida miisaaniyadda Ganacsiga iyo dheef iyo daynta ee ku eg 31.12.1974 ee wax alah wixii kale ee falanqays u baahan.
- 3) Magacaabid Maamule Idman.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka kuqoran buugga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanayo, ama se, kuwa dhigay qaybahoodii Bangi ku yaal Muqdisho, ama Xarunta Shir-kadda 1.7.1975.

(103)

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLE ORDINARIA

Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S— S.p.A

Sede in Mogadiscio

Gli Azionisti della Società per Azioni «Arredamenti Metallici Somali — AR.ME.S», con sede in Mogadiscio sono convocati Notarile Dott. Francesco Durante in Via Rossi, n° 29 per il giorno 22 Luglio 1975 alle ore 11 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 29 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

- 1) Relazione dell'Amministratore Unico e Rapporto del Collegio Sindacale;
- 2) Bilancio e Conto Perdita & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 Dicembre 1974 e deliberazioni relative;
- 3) Nomina dell'Amministratore Unico.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Scci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale, o presso un Istituto Bancario. 1.7..1975.

(103)

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Arjile Lamb. 3/75 Xasan Cali Xasan iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda Hargeeyso

A M A R (Decreto) N. 17/75

Labada magac ee kor ku qoran waxay keeneen Maxkamadda sida hoos ku qoran:

- 1) Xasan Cali Xasan wuxuu Maxkamadda hor keenay Arji u ku dalbanayo in Buugga Kaydka kuna qoran magaciisa L. 4469/7 ka lumay. Bananka iyo Saldhigyada Booliskana ogeysiyeey, wuxuu codsaday in lagu qoro, Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
- 2) Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad taariikhdeedu ahayd 3.6.1975 Lamb. yahay 003746 taas oo u ku sheegayo in u lumay buugga Lamb. yahay 4469/7 kuna qoran lacga dhan 500/= buuggaas oo ku qornaa Xasan Cali Xasan lagana samayey bankiga Ganacsiga Ummadda.

Sidaas darteed markii aan eegnay wayaabaha kor ku qoran iyo markii aan arkay qod. 37,27 Xeerka Lamb. yahay 2 socna baxay 9.9.1965, waxaa la amrayaa:

- 1) In uu socon karin Buugga Kaydka Lamb. kor ku qoran yahay laga bilaabo maanta.
- 2) In lagu qoro amarkaas Faafinta Rasmiga ah,
- 3) In lacagtaas ah So Sh. 500/= Bankiga siiyo Arjiilaha magaciisu kor ku qoran yahay muddo ku siman 15 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda. 6.6.1975

Guddoomiyaha M. Gobolka Hargeysa
(Xasan Xaaji Yuusuf)

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
WAXAAN ARKAY DACWADDAN

MARKAN ARKAY waxay ku saabsan tahay Oogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Laanta Kismaayo;

OO AAN OGAADAY inay tahay shaqada Xafiiskan,
MARKAN ARKAY qodobka 69 D.L. 9.9.65 n.2;

Waxaan caddeynayaa dhumidda Buugga Kaydka L. 3308 Shs. 4.000/= (Afarkun) Shs.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiyo MAXAMED NUUR YUUSUF muddo 15 (shaniyotobaan) beri ah, oo laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino) haddan la helin qof kale oo Buugga shegta.

WAXAA KALOO la caddeynayaa in buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

(105)

Kismaayo, 29 Maajo 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
Dr Xuseen Faarax Hilowle

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Waxaan arkhriyey dacwaddan;

MARKAN ARKAY waxay ku saabsan tahay Oogeysiiskii Bankiga Ganacsiga Laanta Kismaayo.

EE AAN OGAADAY inay tahay shaqada Xafiiska;

MARKAAN ARKAY Qod. 69 D.L. 9.65 N. 2;

Waxaan caddeynayaa dhumidda buugga Kaydka Nominativo L.1.316 ku qoran lacag dhan 22.295/= (Laba iyo labaatan kun lababo-qol sagaashan iyo shan) Shs.

WAXAAN AMRAYAA in loo cusbooneysiyo QAASIM MAXAMED CABDI muddo 15 (Shaniyotoban) beri ah, oo laga bilaabo markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah (Bollettino), haddan la helin qof kale oo Buuggaas sheegta, waxaa kaloo la caddeynayaa in buuggaas gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo sita Wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo 6 Juunyo 1975 .

(106)

GUDDOOMIYAHA
MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
Dr. Xuseen Faarax Hilowle

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Hadduu arkay dacwada kor ku qoran;
MARKUU ARKAY waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiikii Bankiga
Ganacsiga Ummada (Ex Roma) uuna ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
HADDUU ARKAY qod. 69 D.L. 9.9.65 n. 2;

WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda Buugga Kaydka (Ammortamento libretto) Lamb. 985/4
oo ay ku qornayd Shs. 8.898/= (Sideed kun sideed boqol iyo sagaashan
iyo sideed) noociisuna haa al portatore;

WUXUU AMRAY

In loo sameeyo buug cusub ninka la yiraahdo Ismaaciil Maxamuud
Nuux, oo iska lahaa buugga kor ku tilmaaman ee la caddeyey lumidiisa
sida ku cad warqadda Bankiga lamb. 1032, ka dib 30 maalmood markii
amarka lagushaaciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda, haddii intaas cidu-
na soo caban.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga la sameyndoona faraha laga saaro Jaalle Ismaaciil Maxa-
muud Nuux ama cid wakaalad shaci ah ka sidata asaga ayadoo la sugayo
30ka maalmood ee kor lagu soo sheegay. 10.7.1975.

(107)

GARSOORAHA MAXKAMADDA

Dr. Yaasiin Shire Faarax

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Hadduu arkay dacwada horay ku qoran;
MARKUU ARAKAY waxay ku saabsan tahay, iyo ogeysiiskii
Bankiga Ganacsiga Ummada (eeg warq. lamb. 1086); Laanta Seddexaad
wuxuu ogaaday in ay shaqadiisa tahay;
HADDUU ARKAY qod. 69 D.L. 9.9.65;

WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda buugga keydka lamb. 2150/4 oo ay ku qornayd lacag dhan
Shs. 2.215/= (labakun lababoqoltobanshan) iskana lahaa ninka la yi-
raadho Cabdullaahi Cilmi Sahal, sida ku cad warqadda Bankiga kor ku
maalmood ee kor ku tilmaaman. 15.7.1975.

WUXUUNA AMRAYAA

In loo sameeyo Jaalle Cabdullaahi Cilmi Sahal buug keyd oo cusub,
ka dib markii 30 maalmood ka soo wareekato markii amarkan lagu faafi-
yo Faafinta Rasmiga ee Dawladda;

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga la sameyn doono gacanta laga saaro Cabdullaahi Cilmi
Sahal ama qof Wakaalad sharci ah asaga ka sita ayadoo la sugaayo 30ka
maalmood ee kor ku tilmaaman.

GARSOORAHA MAXKA. GOBOLKA

Dr. Yaasiin Shire Faarax

(107his)